Ardayda Dugsiga Hal-abuurka Sayniska oo u leexday dhanka warbaahinta si ay lacag ugu ururiyaan cilmi-baarista kansarka

Dugsiga Hal-abuurka Sayniska oo hal hayskoodu yahay "Ku dhiirigelinta ardayda in ay noqdaan kuwo si madax bannaan u fikira, wax u barta, isla markaana dhibaatooyinka u xalliya." Mashruuca socda ee lacagta loogu ururinayo cilmi-baarista kansarku wuxuu muujinayaa sida ay ardayda dhigata dugsiga K-8 u buuxinayaan ballanqaadka hal hayskooda.

Koox ka tirsan ardayda waaweyn ee dugsi ku yaala Koonfurta-bari ee Portland ayaa isku dayaya in ay ururiyaan lacag gaaraysa $125,000 si ay u maalgeliyaan cilmi-baarista kansarka. Awoodooda dhanka lacag ururinta: warbaahinta dhanka maqalka 'podcasts'.

"Waxaan u maleynay haddii ay sheegaan sheekooyinka iyaga oo adeegsanaya warbaahinta dhanka maqalka 'podcast', ay ka dib markaa kor u qaadi doonaan in fiiro gaar ah wax loo yeesho iyo rajada ah in la ururiyo lacag iyaga ka caawin doonta in wax lagaga qabto fikradan ah sida ay u daawen karaan kansarka, ama ugu yaraan u siin karaan rajo," ayuu sheegay Rawls Moore, oo ah macallinka xisaabta/tiknoolajiyada.

Lacagtu kaliya ma aha deeq, balse waxay ardayda Dugsiga Hal-abuurka Sayniska u oggolaan doontaa in ay ku shaqeeyaan shaybaar dhexdiisa si ay daraasad ugu sameeyaan sida unugyada kansarku u dhaqmaan ama falcelinta u sameeyaan isla markaana iskugu dayaan in ay la yimaadaan fikrado si loo joojiyo cudurka.

Warbaahinta dhanka maqalku' podcasts' waxaa ku lug yeelan doonaa qiyaastii 80 arday isla markaana lagu dabooli/hadli doonaa noocyo kala duwan oo kansar ah. Tusaale, mid ka mid ah waxaa loogu yeeri doonaa Boqolkiiba Eber "Zero Percent" wuxuuna dabooli/lagaga hadli doonaa bukaanada xanuunkoodu dhimashada horseedo. Mid kale ayaa ah "Waa Maxay Sababta Nibirigu 'Whales' Aanu U Qaadin Kansarka "Why Don't Whales Get Cancer," kaasi oo ah sahamiska sababta xayawaanka weyn ee badda ku nool aysan ugu geeriyoonin cudurka. Warbaahinta dhanka maqalka 'podcasts' oo kale waxaa lagu fiirin doonaa adduunka oo idil iyo noocyada kala duwan ee kansarka ee taariikhda oo dhan soo jiray.

Isla haddaba, hal koox oo ardayda ka tirsan ayaa qaaday wareysi ay la yeesheen ciyaaryahanada hore uga tirsanaan jirtay ciyaaraha olambikada ee jimicsiga 'gymnast' Shannon Miller, oo dagaal kula jirta kansarka ilma galeenka. Ardayda waxay Miller ka heleen Facebook wayna la xiriireen, iyaga oo ka qaaday wareysi socday qiyaastii 19 daqiiqo iyada oo ay u badan tahay in loo kala qaybiyo laba barnaamij oo ah warbaahinta dhanka maqalku' podcasts'.

Warbaahinta dhanka maqalku' podcasts' waxaa la heli doonaa iyada oo leh qaabab badan oo ay ku jiraan iTunes, Spotify iyo Google Play, iyada oo magaceeda hoose yahay "Education Upload." Ardaydu waxay jeclaan lahaayeen in ay helaan qof kafaala qaada warbaahintooda dhanka maqalka' podcasts', laakiin waxay sidoo kale maalgelin ku raadinayaan ololaha ay ka wadaan Consano.org, oo ah qaab lacagta loogu ururiyo cilmi-baarista dhanka caafimaadka.

Lacagtu waxay aadi doontaa kharashyada iyo in lagu maalgeliyo shaqaalaha cilmi-baarista ee guud ahaan Machadka Horumarinta Daaweynta Kansarka Carruurta oo ku yaala Beaverton. Rajadu waa in ardaydu ay awoodaan in ay bishiiba u safraan CC-TDI si ay uga qayb qaataan shaqada ay qaybta ka noqon doonto ukunta shimbira quail, taasi oo noqday qalab muhiim u ah dhanka cilmi-baarista kansarka sababta oo ah waa mid qiime jab isla markaana ay sahlan tahay in lagu shaqeeyo marka loo eego dooliga/jiirka.

Ku dhowaad dhammaan hawsha safarka inteeda badan si loo dejiyo barnaamijka waxaa qabtay ardayda.

"Waxaa jiray mar ay sanadkii hire ardaydu ay Google ka raadinayeen meel ay ka gataan unugyada kansarka, sidee ayaad u diri kartaa unugyada kansarka, waa maxay qiyaasta unugyada kansarka ee aad korinayso," ayuu sheegay Moore.

Shaqadu waxay bilaabantay sanadkii la soo dhaafay, balse waxaa mashquuliyay markii arday ka mid ah fasalladu laga helay cudurka kansarka, iyada oo muhiimada dhanka lacag ururinta loo leexiyay isaga iyo qoyskiisa. Iyada oo barnaamijku lagu dhisay sanad dugsiyeedkani, farxadda ku saabsan in uu ku dhisan yahay dugsi la kala dooranayo in wax diiradda la saarayo, halkaasi oo ay ardaydu wax ku baran doonaan iyaga oo adeegsanaya sayniska.

"Ardayda fasallada lixaad ee aan qaybta ka ahayn tani ayaa isla hadaba codsanaya in ay ku lug yeeshaan," ayay sheegtay Kyle Hunter, oo ah macallimada sayniska oo ay barnaamjka kor kala wada socdaan Moore. "Wuxuu dhab ahaantii nolol cusub gelinayaa ardayda."

Maalinii Jicmaha, wareyi iyo qof kamarad qaade/fiidiyow duube ah oo ka socday KOIN ayaa ku sugnaa dhismaha si ay u duubaan muuqaal subaxnimada Khamiista laga baahin doona xarunta telefishanka bandhigooda subaxdii.